

Nidaam doorasho madaxbannaan oo khuseeya adeegga guryaha

Degmada Halmstad waxay isticmaalaysaa, sharci nidaam doorasho madaxbannaan oo khuseeya adeegyada guryaha (LOV). Doorashadaa madaxa bannaani waxay khuseysaa adeegyada dadweynaha loo sameeyo iyo daryeelka adeegyadaba. Taas macnaheedu waxa weeye haddii aad adigu tahay qof loo oggolaaday in loo sameeyo adeegga iyo/ama daryeelka waxaad awood u leedahay inaad adigu doorato cida/shirkada adeegga kaa caawinaysa.

Cida hawsha qabanaysa degmada ayaa oggolaatay ama ansaxisay

Degmadu waxay go'aansatay shuruudaha looga baahan yahay cida/shirda adeegyada guryaha fulinaysa si ay u soo buuxiyaan shuruudaha si ansixiyo ama loogu oggolaado si ay cida hawsha fulinaysaa u sugaan daryeelo iyo adeegyo tayo wanaagsan leh.

Marka aad adigu codsanayso dadaalada (insatser) lagu bixiyo adeegyada guryaha markaa waxa warbixin adiga ku siinaya gacanyaraha ama xoghaynta arrinta gacanta ku haysa ee caawimada bixisa arrimaha khuseeya nidaamka doorashada madaxa bannaan iyo cida/shirkadaha aad adigu kala doorankarto.

Xaafadaha kala duwan ee magaalada

Degmada halmstad waxay u kala qaybsan tahay kow iyo toban waaxood ama qaybood. Hal shirkad oo si baraayfad ah ay dad gaar ahi u leeyihiini waxay ka hawlgelinkartaa hal ama meelo badan oo xaafadaha magaalada katirsan. Arrintaasi waxay keenikartaa in dhammaan shirkadaha la ansaxiyey oo dhami aanay ka hawlgelin waaxaha ama xaafadaha magaalada oo dhan. Shirkada baraayfadka ahi waxay sidoo kale dadka wargelinaysaa inay leedahay xuduud aanay dhaafikarin inta saacadood ee ay adeegga shaqada ku qabankaraan muddo bil gudaheedaha. Hawlaha degmadu waxay ka jiraan waaxaha ama xaafadaha magaalada oo dhan mana laha karaan waxqabad oo xadidan. Shirkadu markay wax soo bandhigayso waxa ku jirta meelaha ama xaafadaha ay adeegga ka bixinayso ee lakala doorankaro.

Sidan ayaad adigu samaynaysaa doorashadaada

Macluumaadka ku saabsan cida adeegga fulinaysa waxa bixinaya gacanyaraha ama xoghaynta qaybta caawimada ka shaqeeya waxa kale oo jira kataloog ama tusmeeye la doorankaro oo macmiisha loogu talagalay iyo bogga internetkaba. Adiga ayaa shakhsiyan dooranaya adigoo buuxinaya shirkada ama cida aad adigu doonayso inaad foomka doorashada ku buuxiso kadibna waxaad u diraysaa gacanyaraha ama xoghayaha qaybta caawimada ka shaqeeya. Markaa gacanyaraha ama xoghayaha qaybta caawimada ka shaqeeyaa dalab ayuu samaynayaa oo wuxuu u dirayaa shirkadii aad dooratay, iyaga ayaa markaa kula soo xiriiraya kadibna adiga iyo iyaga ayaa siwadajira qorshe u samaynaya sidii ay caawimada u fulin lahaayeen.

Haddii aanad adigu doonayn inaad doorato cid adeega guriga kuu qabata markaa waxa lagu doorayaa cid hawsha kuu fulisa sida ku qoran liiska kala horeynta (turordningslista). Warbixinta muhiimka ah ee ku saabsan liiska kala horeynta (turordningslista) waxa laga heleyaa bogga internetka ee degmada www.halmstad.se ama telefoonka tooska ah 035-13 70 00 ee Halmstad

Haddii aad adigu doonayso inaad bedelato shirkada ama cida hawsha kuu qabanaysa waxaad buuxinaysaa foomka doorashada (valblanketten) kadibna waxaad u diraysaa gacanyaraha ama xoghayaha qaybta caawimada ka shaqeeya (biståndshandläggaren), bedelka waxa la samaynayaa muddo 14 maalmood gudahooda ah. Markaa gacanyaraha ama xoghayaha qaybta caawimada ka shaqeeya ayaa la xiriiraya shirkada /kooxda adeega guryaha kuwaas oo fuliya adeega guryaha waxaanay u sheegayaan inaad adigu doonayso in aad bedesho shirkada kadibna waxay wargelinayaan shirkad cusub ee aad ku bedelanayso.

Adeegyo dheeraad ah

Dadka baraayfadka ah ee hawasha fulinayaa waxay leeyihiin fursad ay dadka ugu soo bandhigaan adeegyo dheeraad ah. Haddii aad adigu doonayso in shaqooyin gudaha ah guriga lagaaga qabto (hushållsnära tjänst) taasi kuma jirto shaqooyinka laguugu talogalay in lagu qabto ee adiga ayaa markaa shakhsiiyan u ballansanaya kadibna cida hawsha kuu qabata ayaad lacagta toos u siinaysaa adiga oo raacaya liiska qiimaha ay lacag ahaan ku rabaan, degmadu adeegyadaas mas'uul kama aha. Warbixino dheeraad ah oo la xiriira adeegyada dheeraadka ah adiga ayaa shakhsiiyan kala xiriiraya cida ama shirkadaha adeegyadaas sameeya. Adeegyada dheeraadka ahi kuma jiraan adeegyada guryaha ee ay degmadu bixiso.

Khidmada ama kharshku waa isku mid qofku meeshuu doonaba ha doortee.

Khidmada ama kharashka waxa lagu saleeyey canshuurta guud ee ugu saraysa ee qaranka oo dhan laga bixiyo. Khidmada ama kharashka aad ka bixinayo adeegga gurigu waa isku mid iyadoon loo eegin inay shirkadu tahay mid baraayfad ah ama mid ay degmadu leedahay.

Faahfaahinta xiriirka

Si toos ah ayaad ugala xiriiraysaa gacanyaraha ama xoghaynta qaybta caawimada ee Halmstad telefoonka 035-13 70 00. Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan shirkadaha ama cida adeegga fulinaysa waxa laga helikaraa meelihii lagu soo bandhiga iyo bogga internetka.

Foomka doorashada iyo macluumaad dheeraad ahba waxa laga helikaraa bogga internetka ee degmada Halmstad: www.halmstad.se